

Toddobaadyada wax barashada ee ku saabsan afka iswiidhishka ee ajaaniibta (sfi)

Adigaagan wax baranaya ama bilaabaya barashada sfi ga waxaa laguu qoondeeyay tiro usbuucyo waxbarasho ah oo leh taariikh billow iyo taariikh dhammaad. Markii aan bixinno doowro, waxa aan tixgelin siinaynaa maclumaadka aad adigu ku soo gudbisay codsigii arjigaaga sfi ga. Adiga taariikhdaada waxbarasho ee aad kala timid waddan kale iyo waliba daraasadihii hore ee sfi-ga ayaa saameyn ku yeelanaaya hadba koorsada adiga kugu habboon. Tirada usbuucyada daraasadda ee doowro kasta way kala duwan tahay inta u dhexeysa 30 iyo 48 toddobaad.

Marka ay usbuucyada daraasadda ee doowradu dhammaadaan, waxaa la ebyaa dhibco siinta oo la dejiyaa. Shahaadada waxa lagu qiimeeyana waa A-F, sida ku xusan xeerarka Hay'adda Qaranka ee Waxbarashada. Darajada F macnaheedu waa lama gudbin. Haddii aadan adigu haysan waqtii aad ku dhammaysato doowrada oo ay jiraan sababo macquul ah waxaa jira oo lagu siin karaa ugu badnaan 20 toddobaad oo doowro dheeraad ah. Adiga oo ah arday ku jira sfi, waxa aad sidoo kale si dhakhso leh wax ku baran kartaa oo aad ku heli kartaa dhibco ka horeya tirada usbuucyada waxbarasho ee cayiman. Arrintaas kala hadal macalinkaaga sfi ga xaaladdaada waxbarasho ee gaarka ah.

Inta lagu guda jiro muddada daraasadda, macallinkaaga ayaa si joogto ah ula socon doona oo kaala hadli doona horumarkaaga xagga luqadda Iswiidhishka. Inta lagu jiro wada hadalka waxaa la yeelan karaa doodda ku saabsan isbeddelada shaqsiyadeed sida fursadaha wax qabadyada kale ama daraasado kale ayaa sidoo kale lagu soo qaadi karaa.

Qeybaha doowrada iyo tirada toddobaadyada ee ku saabsan sfi

| 1A | 1B | 1C | 1D |
|--------------|--------------|--------------|--------------|
| 48 toddobaad | 40 toddobaad | 30 toddobaad | 30 toddobaad |
| 2B | 2C | 2D | |
| 48 toddobaad | 30 toddobaad | 30 toddobaad | |
| 3C | 3D | | |
| 40 toddobaad | 30 toddobaad | | |



Salaan iska caadi ah

Maamulaha
Wax barashada dadka waa wayn

Postadress
SE-781 81 Borlänge
Besöksadress
Röda vägen 50

Telefon
0243-740 00 (vxl)
Fax
0243-745 50

E-post
kommun@borlange.se
borlange.se